

Warbixin Cusub oo Ku Saabsan Xaaladda Jadeecada ee Alberta

Abriil 11, 2025 Weydiimaha warbaahinta ([Media inquiries](#))

Agaasimaha Guud ee Caafimaadka ee Alberta, Dr. Mark Joffe, ayaa soo saaray bayaankan soo socda oo ku saabsan xaaladda jadeecada ee Alberta iyo sida ay dadka reer Alberta iskaga ilaalin karaan cudurkan:

“Dillaacyada jadeecada ayaa ka dhacaya guud ahaan Kanada, oo ay ku jirto Alberta. Ilaa iyo Abriil 11, waxaa gobolka laga xaqiijiyay 58 kiis oo jadeeco ah, waxaana si dhow loola socdaa kororka kiisaska ka jira gobollada koonfureed iyo kuwa dhexe. Inkasta oo tirada kiisasku ay walaac leedahay, waxaan rabaa inaan dadka reer Alberta u xaqiijiyo in saraakiisha caafimaadka dadweynuhu ay si wanaagsan u maareynayaan kiisaska iyo dadka lala xiriirinayo, ayna la shaqeynayaan hoggaanka maxalliga ah si ay u taageeraan bulshooyinka uu cudurku saameeyay.

“Ilaa iyo Abriil 11, waxaa la qiyaasayaa in ku dhowaad 48 kiis oo jadeeco ah oo la xaqiijiyay ay u badan tahay inay dhaafeen muddadii faafinta cudurka (waqtiga uu qofku ku gudbin karo jadeecada qof kale). Si kastaba ha ahaatee, waxaa muhiim ah in la ogaado in tani aysan si buuxda uga tarjumayn khatarta ka jirta bulshada, maadaama ay jiri karaan dad qaba jadeeco aan la aqoonsan, oo ay ku jiraan kuwa gobolka soo galaya meelaha uu cudurku ka socdo, sidoo kalena tani ma muujinayso tirada dadka laga yaabo inay horey u la kulmeen cudurka jadeecada.

“Jadeecada waa cudur ka khatar badan xanuunnada kale ee caamka ah ee carruurta ku dhaca. Waxay keeni kartaa oof wareen, barar maskaxeed, xitaa dhimasho. Calaamadaha hore ee jadeecada waxaa ka mid ah qandho, qufac, sanko oo dareera, indho casaan ah, iyo finan cas oo faafa kuwaas oo soo baxa saddex ilaa toddoba maalmood kadib marka qandhadu bilaabato. Haddii aad muujinayso

calaamadaha jadeecada, guriga joog oo wac 811 si aad u hesho tilmaamo caafimaad oo dheeraad ah.

“Iyadoo la eegayo dillaacyada jadeecada ee ka jira guud ahaan gobolka, waxaan rabaa inaan xasuusiyo dhammaan dadka reer Alberta in dillaacyadan si weyn looga hortagi karo. Reer Alberta waxay iskaga ilaalin karaan cudurka iyo inay dadka kale u gudbiyaan, iyagoo hubinaya in tallaalkooda jadeecada uu yahay mid dhammaystiran. Tallaalka jadeecada waxa uu yahay tallaabada ugu muhiimsan ee caafimaadka dadweynaha si looga hortago jadeecada. Tani waxay si gaar ah muhiim ugu tahay waalidiinta carruurta da’doodu tahay labo sano iyo ka yar, kuwaas oo u nugul dhibaatooyinka halista ah ee ka dhalan kara qaadista cudurka jadeecada.

“Tallaalka jadeecada waa mid ammaan ah oo si aad ah waxtar u leh kahortagga cudurka iyo dhibaatooyinka ka dhasha, wuxuuna si fudud ugu diyaar yahay dadka reer Alberta ee u qalma. Si aad u ogaato haddii aad u qalanto inaad hesho tallaalka, haddii aad ku nooshahay aagga Calgary ama Edmonton, waxaad wici kartaa Khadka Ballanta Tallaalka adigoo wacaya 811 inta u dhaxaysa 8 subaxnimo ilaa 6 galabnimo. Haddii aad ku nooshahay aag kale oo Alberta ka tirsan, fadlan la xirii xaruntaada caafimaadka dadweynaha ama xarunta caafimaadka bulshada ee deegaankaaga.

“Waaxda Caafimaadka ee Alberta waxay si joogto ah u bixisaa warbixino la xiriira kiisaska jadeecada bogga alberta.ca/measles. Warbixinnadaas waxaa ka mid ah xog faahfaahsan oo ku saabsan kooxaha da'da, qiyaasta dadka dhaafay muddadii faafinta cudurka, iyo sidoo kale macluumaad ku saabsan heerka tallaalka ee kiisaska iyo tirada tallaalkada la bixiyay.

“Waa muhiim in dadka reer Alberta ay kaalin ka qaataan kahortagga faafitaanka jadeecada. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo: alberta.ca/measles.”

Macluumaad La Xiriira

- Caafimaadkeyka Alberta ([MyHealth Alberta](https://myhealth.alberta.ca))
- Jadeedada – Alberta.ca ([Measles](https://alberta.ca/measles) – Alberta.ca)
- Measles Exposure in Alberta – AHS ([Measles Exposure in Alberta - AHS](https://alberta.ca/measles))

Weydiimaha warbaahinta

Andrew Livingstone

587-545-7075

Agaasimaha Isgaarsiinta, Wasaaradda Caafimaadka